Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q1AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasoow "Shiribmaal"

Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q1AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasoow "Shiribmaal"Xulka iyo Xusuusta Suugaantu, waa taxane aan ku taabba gelinayno suugaantii ay ka tageen halabuuradii caanka ahaay ee maguurtada sooyaalka galay, ha ahaadeen kuwa geeriyooday iyo kuwa iminka nool'e. Wuxuu noqon doonaa taxane maalin kasta oo Arboco ah kusoo bixi doona, mareegtaan **LAASHIN.COM**. Waxaan ku diiwaan gelin doonnaa guud ahaan suugaanta Soomaaliyeed jaadadkeeda kala geddisan, intii aan awood karno.Guurowgaan magaciisa waxaa la yiraahdaa: ?Yaabka ka heshiiya? waxaana tiriyay: **Abwaan Maxammad Gacal Xaayoow (A.U.N.)** wuxuuna uga qayb galay tartan suugaaneed ka dhacay waddanka Maraykanka, oo ay soo qabanqaabiyeen aqooonyahnno Soomaliyeed. Waa guurow aad u qiima badan oo na baraya awoodda curineed ee **Abwaan Maxammad Gacal Xaayow** Eebbe ha u naxariistee. Wuxuu ku baxaya Xarafka **?YA'DA?** oo ah xarafka ugu adag ee lagu maansoodo halabuurada wax ka curiyaana ay kooban yihiin waana Guurow waddaniyeed ka mid ah kuwa ay ugu jecel yihiin dadyowga Soomaliyeed aadna ay u qaddariyaan. innagoo dhihi karno Abwaanku waa muftiga koobaad ee xagga dal iyo dad jaceylka, maxaa yelay waa Abwaanka kaliya ee aan weligii qabyaalad, qabiil, qolo, iyo deegaanba u gabyin. Waana sababta ay ummadda Soomaaliyed milgaha iyo maamuuska ugu hayaan Eebbe qabriga ha u waasiciyo'e. Guurowguna wuxuu u dhacay sidaan ee ka bogasho wacan:**Yaab adduunyo waa badanyahee, Boqol yaxaaslaydaYixda nagu dillaaciday wixii shalay, Na yeelsiiyayninki yoom ku xiga yoolka geey, Hana ku yaasiinshoYicibtiisa nabad laguma guran, Yaallinka ahayd'eYebedhaal gu'eed nooma di'in, Yaare loo bogaye Lama yeelan yaambiyo misaar, Yebesha reebaaneYaanyada raggii diidi jiray, Yaabiskow gebayeYaaq yaaqsi dheregtaa dhashee, Yooca loo kariyayYarya wayn qabiil lagu yurgamo, Yarad naloon siiyeCalankaase laysugu yimaad, Yaaqa dheer suraneYoomkaanu waa kama danbeys, Waa isugu yeelaLaydin yiriye soomaali yahay, Yaabka ka heshiiya.Yatiin aabba laay iyo dadaan, Yicista kaalmeeyaYalalaxada geed laga dugsado, Ugu yagleelayninEe yamaaruggii hoose iyo, Yaayagii gubayay Yabaaqane ka foge yeey ku yu'an, Ugu yed qaadaayaIyo kii yabooh iyo siddaqo, Yurub usoo haybshayYay maqnaane yoondhaaf warbixin, Yaable maqashiiyayUbadkeennu waa kala yaqaan, Kii wax ugu yaaleYoolbaar la'aanbaa bad wayn, Loo yunbanayaayeHaddii yeesho quruntaa waqtigu, Kaa yurqamiyaaheYaas yaasadii naga kacdiyo, Dhogorta yoolaasha Yaxashada dareen inuu ku jiro, Waa yaqiinsadayeYoomkaanu waa kama danbeys, Waa isugu yeelalaydin yiriye soomaali yahay, Yaabka ka heshiiya.Haddii yebel baroorada gu'eed, Geed yaleeshanaya Yaruursadu nagaari ku yeel, Yalalax dhihi waayoWaana yaarsadaa sida bukan, Ciil la yuurarayeYiddanoo martiyo soo yurgama, Gogosha loo yaacsho Ma yuwaade yedeloow hogtaa, Waana loo yimide Haddow yaxar ahaay xoola nool, Kama agyeeraaneHaddii yayga lagu soo ag dhigo, Yoowmal Aakhirda Oon adduun wax kuu yaalla jirin, Waa laguu yimideYaasiinka waa kugu celshaa, Macallin yool gaar'e Raggi yimidi Soomaali yiri, Aan isugu yeernoKolleey yeera yeeree yam iyo, Aan ku kala yaacnoYabooh laguma helo ceebtaniis, Kama Yureeydaane Yoomkaanu waa kama dambays, Waa isugu yeelaLeeydin yiriye soomaali yaheey, Yaabka ka heshiiya.Yaatihiin haddii nalan yiraa, Magacu waa yaallinHa ka yaabin yooc iyo sarmaan, Meel is kula yaale Ka yabaala jiriddee ma nihin, Diima kala yeeshay Yac moogaanse nahay caanahaan, Yirac ku TuurnaahuWixii yeellay Koofur Afrikee, Medabbaduu yeelay Ee Yuhuuddu Falastiin wax badan, Uga yabiiq siisayAmbaan yoomka maantaa ognahay, Yamanta lays raacshay Yebedhaalki Honkon waxii, Yoolka madar geeyay Amma yaxabti Baarliin tirtiray, Kii yaqiinsadaye Yeed wax uga shishaynoow waddada, Lagu yaloombaayo Wax ku yeelo kuwa loo yasiray, Ee yiddo u buuxdo Wax ka sii yar yoogada muggeed, Kugu yaboohayneYoomkaanu waa kama dambeys, Waa isugu yeelaLaydin Yiriye Soomaali yaheey, Yaabka ka

heshiiya.Yaab waxaa leh Soomaali yiri, Yeelimaa nabadeYaa le ciidda yaa heer u maqan, Yow sugaa calanku?Yaa maala yaa yibir ka guray, Waxa u yaal Yaa og?Yaa yirbixiyay yaa yirid ka gubay, Yaa u kuba yeela?Yaa difaacay yoomay caddahay, Yoow dagaal yahana? Yaa u yeera yow macalinkiya, Yow aqoonyahana?Yaa wax baraya yay wax u bartaan, Yaa dugsi u yeela? Yaa walwaala yaa wax u yaqaan, Yaa cilmi u yeera?Yaa yuqsiisay yabaxii kabaxay, Waxa u yaal yaa og?Yaa ii warrama yaa wax ka og, Yaa waddaniyiina?Yedda laguma qaban Qaranimadii, Yaallinka ahayd'eHayeeshee yamin iyo shimaal, Ugama yeertaaneYoomkaanu waa kama dambeys, Waa isugu yeelaLaydin yiriye Soomaali yaheey, Yaabka ka heshiiya.Yarsinkii hilbaha yaaddadada, Yacayga noo saare Lagu yuubtay habar yaasadaan, Yuuq la dhihi waynayYaxaas yaxaas waa sidaan biya hadday, Bari u yoolaaneYaa mudan la waay iyo yufkay, Nin uga yaalliineYaabya amankaag waxaan ahayn, Kama yimaadiine Yax yax iyo xishoodkaba raggii, Lagu yaqiin wayne Is la yoontu calaf yaasa go'ay, Kaalinta u yeeshay Yaasiin iyo kun yaahoo xitaa, Kumma Yalmaayaane Wixi yaal hunguri yuunnadii, Yaydin wada siiyaGaashaanka ugu Yuurarsaday, Libin ma yeeshaane Yoomkaanu waa kama dambays, Waa isugu yeelaLaydin yiriye Soomaali yaheey, Yaabka ka heshiiya.Yabooh khayr leh Eebbow na sii, Yaab tiraa tahaye Allow dhebedka yow Laynayiyo, Yibinta yeerayda Iyo yoolka nagu fuuraree yar iyo, Wayn laayay Labadaba Allow naga yasire, Nagu abaal yeelo Yacaad waxa ka dhigay dhiigga yaga, Caafimaad Yariye Yuudaan qabyaaladu ka xume, Beeshi kala yaacdayEebbow isugu yeer adaa, Noo yuwaad nabade Yool yool carruuruhuba, Waysugu yimaadiine Hayeeshee yabaaq male haddaan, Yuunga loo karineYoonki Eebba siiyana hunguri, Waa yamyamiyaaneEebow abaar yuubataa, Waa col kula yaale Yeddaadaan isku halayn jirnee, Noogu yeer calafka. La soco qaybaha xiga. **W/D: Xasan Cabdulle Calasoow "Shiribmaal"**